

## **Ku: Shirgudoonka Golaha wakiilada**

### **Uj: mooshinka wax ka bedelka diiwaangelinta**

Sida lawada ogsoon yahay waxa dalka ka dhacay diiwaangelin ay bulshada Somaliland ka qayb gashay oo muruq iyo maal badaniba inagag baxay waxayna inoo suurta gelisay in aynu ku galno doorashadii madaxtooyada Somaliland ee ay ka dhalatay xukuumada bada talada haysaa taas oo ay ku guulaysatay tirade ugu badan dadkii codeeyey codkoodana ku bedelay xukuumadii hore, mid kalena ku doortay taas oo muujinaysa sida ay lagama maarmaanka u tahay diiwaan gelintu markasta oo la gelayo doorasho lana hirgeliyo dimuqraadiyada dalka ka jirta.

Si loo ogaado in diiwaangelintaasi u dhacday sidii loogu talo galay waxa komishanka qaranku u tafaxaytay in uu hubiyo, kala hufo, kalana haadiyo diiwaangelintaas waxaana markiiba soo baxday inay jirto galdalooloyin badan oo ay yeelatay diiwaangelintu waxaana taas ka marag kacaya sida ay gudigu isugu hawleen dib u sixida iyo xal u helida khaladka dhacay, hase yeeshee komishanku kuma guulaysan inuu si dhamaystiran dib u sixid ugu sameeyo.

Waxa kale oo warbixino kala gedisan ka diyaariyey hayado ajnabi iyo wadaniba leh waxanay warbixintooda ka mid ahayd warbixintii ay soo saartay hay'ada ERIS oo ah hay'ad loo xilsaaray kala shaandhaynta diiwaangelinta codbixiyayaasha waxay warbixinteeda ku sheegtay in diiwaanka codbixiyaha ee ay ku salaysnayd doorashadii 2010ku ay ku jireen khaladaad badan iyo kucelcelin xad dhaaf ah iyadoo qalabkii loo isticmaalayna uu ka gaabiyey inuu heerkii looga baahnaa wax ku saxo, sidoo kalena diiwaanku waxa khaladkiisu gaadhay heer lagu tilmaamo in 30% ay khalad yihiin taas oo macneheedu yahay in sadexdii qofba mid si aan sharci ahayn loo diiwaan geliyey). Waxay kale oo sheegeen hayadahaasi in aanay suurta gal ahayn in diiwaangelintaasi markale doorasho lagu galo.

Waxa kale oo xusid mudan in aan diiwaan gelintii hore inoo suurtoogelinayn in markale doorasho lagu galo sababahan awgood.

- Iyadoo uu madaxweynaha laftiisu ka dhawaajiyey in diiwaangelintii hore uu madmadow badani kujiray oo ay lagama maarmaan tahay in dib loo eego.
- Iyadoo ay jiraan muwaadiniin badan oo reer guuraa ah oo aan is diiwaangelin doorashadiina ka qaybqadan , sababta guurguurka iyo geedi raaca darteed.

*Handwritten signature and date:*  
Diiwaangelinta  
Xarafka  
24/4

- Iyadoo da'yar badan oo aan markaa qaangaadh ahayni ay maanta qaangaadheen xaq dastuuri ahna u leeyihiin sharci ay ku codeeyeen.
- Iyadoo ay jiraan dad badan oo markii diiwaangelintu dhacaysay dalka dibadiisa kumaqnaa oo diiwaangelinta dabadeed soo gurya noqday oo u baahan in ay wax doortaan lana doorto si ay taas u helaana diyaar u ah in dib loogu celiyo diiwaangelinta.
- Iyadoo diiwaangelintu sideedaba ahayd mid loogu talo galay in hal mar la adeegsado oo aan dib loo isticmaalin waxaanaynu odhan karaa waxay ahayd Tijaabo
- Iyadoo aan mashiinku (Serverka) aanu awood u lahayn in uu astaamaha gaarka ah ee shakhsiga si sax ah u qaado (Sida faraha) si uu u soo saaro waraaqaha aqoonsiga jinsiyada iyo kan codbixinta oo sax ah.
- Iyadoo la cadeeyey in aan barnaamijka Software ka ah ee la adeegsanayay aanu ahayn mid ku haboon hawsha loo adeegsaday taas oo ay cadeeyeen dad khubaro ahi.

#### **Hadaba Mudanayaasha Gollaha wakiiladu:**

**Markay arkeen:** diiwaangelintii dalka ka dhacday iyo siday u dhacday, goob joogna ay u ahaayeen sidii ay wax u dheceen.

**Markay Xaqiiqsadeen:** in diiwaangelintu aanay u qabsoomin sidii la rabay, isla markaana ay gacantooda gashay hayado ajnabi ah dhamaan sirtii dalku lahaa iyo macluumaadkii gaarka ahaa ee muwaadinku

**Markay darseen:** warbiximaha laga qoray iyo khaladaadkii dhacay kadiiwaangelintu ayna adagtahay in markale lagu galo doorasho iyadoon waxba laga bedelin sida ay haatan tahay.

**Markay isku qanciyeen:** in ay jiraan muwaadiniin badan oo aan goob joog ahayn oo dalka dibada uga maqnaa ama aan qaangaadhin waqtigii dalka diiwaangelintu ka dhacaysay ama aan ka qayb gelin

**Markay yaqiinsadeen:** in bulsho badan oo muwaadiniin ahi ay ka digeen in diiwaangelintii hore lagu galo doorashooyinka soo socda, isla markaana ay mawqifkooda u cadeeyeen in aanay diyaar u ahayn in doorasho ka qayb galaan diiwaangelintii hore lagu galo, golayaasha sharcidejinta iyo xukuumadana ugu baaqeen in si degdeg ah wax looga qabto arintaas.

Sababahaas dartood waxay mudanayaashu soo jeedinayaan iyagoo cuskanaya Qod. 37aad ee xeer hoosaadka gollaha

- In wax ka bedel iyo kaabis lagu sameeyo xeerka diiwaangelinta codbixiyayaasha
- In si rasmi ah loo bilaabo diiwaanka taysarada oo ay u xilsaaran yihiin wasaarada arimaha gudaha iyo dawladaha hoose
- Xilka dhamaystirka arintani tahay waajibaadka sharci dejinta